



## Ku Dejinta Kumbuyuutarka Chromebook

Kumbuyuutarada Chromebook waxa ay isticmaalaan ablikeeshinada Google iyo baroosarka webseedka Google Chrome (Chrome icon), marka waxaad ubaahnaan doontaa ciwaanka Gmail-ka Google si aad ugu isticmaasho kumbuyuutarkaada Chromebook.

Haddii aadan lahayn ciwaan Gmail ah, mid ka sameyso halkaan [mail.google.com](mailto:mail.google.com).


Marka xigta, raac tallaabooyinkaan:

1. Wuxuu ku tusayaa ablikeeshinada kumbuyuutarka Chromebook oo kuleh batoonka laga shido qeybta midigta shishe ee batoomada kiiboodhkaaga:
2. Ku xiriiri khadka intarneedka ee Wifi-da. Haddii kumbuyuutarkaada Chromebook uu kuu soo qoro **Network not available (Khadka lama heli karo)**, waxaad kudhufataa/gujisaa batoonka u eg sawirka kuu muuqdo oo kuyaalo qeybta midigta hoose ee shaashada kumbuyuutarka si aad usoo hesho uguna xariiriso khadka interneedka.
3. Geli ciwaankaada kumbuyuutarka Chromebook-ga Geli ciwaankaada Gmail-ka oo dhammeystiran iyo lambar sireedka/baasuweerka kadibna kudhufo/guji **Next (Ku xiga)**. Wuxaa aad arki doontaa farriinta: **Managed by seattlecentral.edu (Waxaa maamula Seattlecentral.edu.)**
4. Sameyso ciwaankaada kumbuyuutarka Chromebook. Kudhufo/guji **Accept and continue (Aqbal oo sii soco)**.
5. Aqbal ablikeeshinada iyo adeegyada Google Play. Kudhufo **More (wax badan)** kadibna kudhufo **Accept (Aqbal)**.
6. Wuxaa sidoo kale dooran kartaa inaad isticmaasho Google Assistant (Caawiyaha Google). Marka aad aragto **Google Assistant works here too (Caawiyaha Google ayaa sidoo kale ka shaqeeya halkaan)**, waxaad doorataa **No thanks (Maya mahadsanid)** ama **I agree (Waan oggolaanaya)**. Haddii aad oggolaaneyso:
  - Wuxaa dhahdaa "Hey Google (Waryaa Google)" si aad u billioowdo Caawiyaha Google. Kadib akhri maclumaaadka kuu soobaxo kadibna kudhufo **I Agree (Waan oggolaanaya)** ama **No thanks (Maya mahadsanid)**.
  - Wuxaa bartaa Caawiyaha Google inuu aqoonsado codkaada adiga oo raacaayo tallaabooyinka soo socdo. Wuxaa sidoo kale kudhufan kartaa **Skip (kagudub)** oona ku joojin kartaa halkaas.

7. Kudhufo **Get started (Hawsha bilow)**. Wuxaa hadda diyaar utahay inaad isticmaasho kumbuyuutarkaada Chromebook.

## Waxa Kujira Shaashada Kumbuyuutarka Chromebook

Walxaha yaryar ee faylasha/astaamaha waxaa laga yaabaa inay ka duwanaadaan kuwa sawirka ka muuqdo.



- Keydka Ablikeeshinada wuxuu ku tusayaa ablikeeshinada kuugu jiro kumbuyuutarkaada Chromebook.
- Wuxaa gashaa Google Play Store si aad ula soo degto ablikeeshino badan.
- Wuxaa isticmaashaa Google Chrome si aad interneedka ugasho.



← Kaqaad sawirka ISKAANKA si aad u boogato webseedkeena  
[itservices.seattlecolleges.edu](http://itservices.seattlecolleges.edu)

[ITHelp@seattlecolleges.edu](mailto:ITHelp@seattlecolleges.edu)